verdandi

20ka su'aalood & jawaabood

EE UGU CAANSAN

ee Verdandis Rättvisekontor

Qaybaha Verdandi waxay bixinayaan adeeg/hawl aanu ugu yeerno ”Rättvisekontor” (xafiiska caddaalada). Halkan waxaanu ku bixinaynaa taageero saaxiibtinimo, hagitaan ku saabsan xuquuqdaada iyo caawimaad ku saabsan xiriirka aad la leedahay hey'adaha dawladda.

Waxa kale oo lagu heli karaa luqadda carabiga, finnishka, ingiriiska, iswiidhish iyo turkiga.

Somaliska/Soomaali

Waanu ku salaamaynaa!

Halkan waxaa ku qoran 20 su'aalood oo caadi ah oo Verdandi ay ka hesho howlaha ay ka qabato ”Rättvisekontoren” (Xafiiska caddaalada).

Dad badan oo yimaada hawlgalka Verdandi waxay rabaan taageero iyo talooyin ku saabsan xiriirka ay la leeyihiin hey’addaha, foomamka, dhaqaalaha iyo arrimaha macaamiisha

Miyaad qabtaa su'aalo aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo?
La xiriir qaybta Verdandi ee adiga kuugu dhow. Waxaad ka heli doontaa cinwaanada iyo macluumaadka lagala xiriirayo dhammaan qaybahayaga Verdandi bogga **verdandi.se** qaybta Xiriirka. Halkaa waxaad ka heli doontaa liiska cinwaannada ee dhammaan qaybaha dalka oo dhan.

Ku soo dhawow Verdandi!

HALKAN WAXAAD KA HELAYSAA BUUG YAR OO DHOWR LUQADDOOD KU QORAN!

1. Waxaan jeclaan lahaa in aan codsado kaalmada kirada guriga, waa maxay xeerarka khuseeyaa yaase la siin karaa?

Kaalmada kirada guriga waxaa laga codsadaa Qasnadda caymiska (Försäkringskassan). Waad codsan kartaa haddii aad keligaa tahay oo aad u dhaxayso 18-28 sano ama haddii ay jiraan carruur ku nool guriga oo 18 sano ama ka yar. Waxaad xaq u leedahay kaalmada kirada guriga ilaa iyo inta uu ilmuhu ku jiro dugsiga sare isla markaana uu helo kaalmo waxbarasho. Sida caadiga ah, waa inaad ku diiwaangashan tahay guriga aad u codsanayso kaalmada kirada guriga.

Kaalmada kirada guriga waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo lagu salaynayo kharashka guriga, cabirka guriga, tirada dadka guriga ku nool, dakhligaaga iyo haddii aad hanti leedahay. Aad ayey muhiim u tahay in aad ogaysiiso Qasnadda caymiska (Försäkringskassan) dhammaan isbeddelka ku yimaadda guriga ama dakhliga. Haddii kale waxaad ku khasbanaan doontaa inaad dib u soo bixiso lacagta Xafiiska adeegga dawlada waxaad ka heli kartaa caawinaad dheeraad ah oo ku saabsan codsiga.

2. Waxaan jeclaan lahaa in aan codsado lacagta kaalmada kirada guriga, waa maxay xeerarka khuseeyaa yaase la siin karaa?

Kaalmada kirada guriga waxaad heli kartaa haddii aad wada qaadato dhammaan lacagtaada hawlgabka. Haddii aad dhalatay 1957 ama ka hor, waa inaad 65 jir tahay ama ka weyn tahay. Haddii aad dhalatay 1958 ama 1959, waa inaad jirtaa 66 sano ama aad ka weyn tahay. Haddii aad wakhti dambe dhalatay, waxa ku khuseeya da’o kale.

Dhib ma laha haddii aad ku nooshahay guri kiro ah, guri aad xuquuqdiisa leedahay, guri bangalo ah ama guriga hawlgabka. Waxa kale oo aad heli kartaa kaalmada kirada guriga haddii aad ka yar tahay 66 sano oo aad qaadato gunnada aktiitifeetka ama gunnada bukaanka. Laga bilaabo da'da 65 sano, waxaad ka dalbanaysaa kaalmada kirada guriga Hey'adda hawlgabka (Pensionsmyndigheten). Inta ka horreysa, waxaad ka dalban kartaa Qasnadda caymiska (Försäkringskassan). Xafiiska adeegga dawlada waxaad ka heli kartaa caawinaad dheeraad ah oo ku saabsan codsiga.

3. Waxa la igu waajibiyey in aan dib ugu soo celiyo lacag Qasnadda caymiska, ka dib markii aan qaatay lacag badan oo ah kaalmada kirada guriga. Waa lacag aad u badan in hal mar wada bixiyo, maxaan samayn karaa?

Haddii aad dareento in go'aanku aanu sax ahayn, waxaad racfaan uga qaadi kartaa Hey'adda caymiska (Försäkringskassan). Haddii go'aanku uu sax yahay laakiin aadan awoodin inaad wada bixiso hal mar, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad kala qaybiso laakiin waa inaad ku bixisaa deynta dhamaanteed laba iyo toban bilood gudahood.

4. Waxaan sameeyay heshiis aad u fiican oo ku saabsan adeegga streaming-ka, laakiin lix bilood kadib waxay bilaabeen inay iga qaadaan lacag aad u badan bil kasta, maxaan sameeyaa hadda?

Aad ayey muhiim u tahay inaad akhrido heshiiska dhammaantii markaad iibsanayso adeeg ama badeecad. Rukumashadu badanaa waxay noqon kartaa mid raqiis ah bilowga hore ka dibna qiimuhu kor ayuu u kacaa muddo ka dib. Tani waa inay ka muuqato heshiiska. Ka taxaddar qoraalka yar yar haddii ay tahay heshiis aad ku xiran tahay muddo dheer.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u joojiso heshiis khaldan, la xiriir La-taliyaha Macaamiisha ee degmadaada. Haddii aanu jirin, la xiriir Hey'adda macaamiisha (Konsumentverket).

5. Waxaan helay qaansheegashooyin (faktoror) ku saabsan alaabooyin aan hubo in aanan dalban Maxaan sameeyaa?

Mid ka mid ah siyaabaha aad uga fogaan karto waxyaabaha la dalbado ama heshiisyada lagu saxiixo magacaaga ayaa ah inaad mar walba hubiso inaad isticmaasho aqoonsiga bangigaaga (bank-id).

Waxa kale oo laga yaabaa inaad dhibbane ka noqoto oo aqoonsigaaga la afduubo. Taas macnaheedu waxay tahay inuu qof isticmaalo magacaaga, tobankaaga lambar iyo cinwaanka guriga si uu u dalbado alaab ama adeeg.

La xiriir shirkadda oo diid qaansheegashada sida ugu dhaqsaha badan. Kadibna u gudbi dacwad booliiska Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad xannibto tobankaaga lambar (ditt personnummer).

6. Kulankii aan la yeeshay qofkii arrintayda gacanta ku hayey ee Qasnadda caymiska/adeegga bulshada (Försäkringskassan/ Socialtjänsten), waxaan ku dareemayaa in aanu si cadaalad ah iila dhaqmin. Verdandi miyey si uun ii caawin karaan?

Hubaal. Verdandi way ku caawin karaan. Waxaanu qayb ka noqon karnaa kulankaaga si aanu kuugu taageerno. Waad ku kalsoonaan kartaa in qofka kula socda aanu wax kaa sheegi doonin adiga, su'aalahaaga iyo dhibaatooyinka xaaladaha kale.

7. Waxaan jeclaan lahaa in aan codsado dhalashada Iswiidhan. Xeerarkee ayaa khuseeyaa?

Si aad u codsato dhalashada iswiidhan, waa in aad buuxiso 18 sano, oo aad awood u leedahay in aad caddayso aqoonsigaaga, inaad muddo ku noolayd Iswiidhan, iyo inaad noloshaada si wanaagsan ugu noolayd Iswiidhan.

Waxaad sidoo kale ku codsan kartaa dhalashada, carruurta aad mas'uulka ka tahay. Waxaa jira kharash lagu dalbado.
Wax badan ka akhri bogga **migrationsverket.se**

8. Waxaan ka baqayaa inaan shaqo la'aan noqdo. Maxaan ka fekeraa anigu?

Waxaa muhiim ah in marka aad shaqaynayso aad xubin ka noqoto A-kassa si aad u heshid lacagta shaqo la'aanta haddii ay shaqo la'aani kugu dhacdo. Haddii aad rabto inaad saameyn ku yeelato waxa ka dhacaya goobtaada shaqada, sidoo kale waa muhiim inaad ka mid noqoto urur shaqaale.

Shuruudaha lagu heli karo lacagtaas waa in aad xubin ka ahayd A-kassa laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, oo aad shaqaysay ugu yaraan 60 saacadood bishii, lix ka mid ah laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, oo aad shaqo doon tahay, aanad ka diiwaangashan tahay Xafiiska shaqada oo aad tahay qof si firfircoon shaqo u raadinaya.

9. Waa maxay shuruudaha igu xiran markaan anigu shaqo doon ahay?

Haddii aad qaadato A-kassa ama lagu siiyo masruufka dhaqaale marka aad shaqo raadinayso, waa inaad dalbataa tiro shaqo ah bil kasta si aad u muujiso inaad diyaar u tahay suuqa shaqada. Shaqooyinkan waa in la soo wargeliyaa Xafiiska shaqada Tan waxaa loo yaqaan ka warbixinta hawlgalka. Caadi ahaan waa inaad raadsataa lix shaqo bil kasta, haddii aanay jirin wax kale oo ku qoran qorshahaaga hawlgalka. Waxaa muhiim ah inaad raacdo tilmaamaha uu Xafiiska shaqadu ku siiyo, maxaa yeelay haddii kale waxay saameyn weyn ku yeelan kartaa dhaqaalahaaga.

10. Maxaan sameeyaa haddii aanan xaq u lahayn A-kassa?

Haddii ay shaqo la'aani kugu dhacdo adiga oo aan lahayn A-kassa, waxaad ka qayb qaadan kartaa barnaamijyada siyaasadda suuqa shaqada ee Xafiiska shaqada, waxaana laga yaabaa inay lacag ku siiyo Hey'adda caymisku (Försäkringskassan). Tan waxaa loo yaqaan taageerada hawlgalka (aktivitetstöd) ama lacagta horumarka (utvecklingsersättning). Mararka qaarkood lacagtu kuma filnaanayso waxaana laga yaabaa inaad u baahato inaad codsato masruuf kaalmo dhaqaale.

11. Ma haysto shaqo, xaqna uma lihi in aan qaato lacagta jirrada ama A-kassa. Maxaan sameeyaa anigu?

Haddii aanad masruufkaaga maarayn karin, waxaad taageero dhaqaale ka codsan kartaa degmadaada. Taageerada masruufka waxaa sidoo kale loo yaqaanaa caawimaadka dhaqaale (ekonomiskt bistånd) ama deeqda kaalmada bulshada (socialbidrag). Deeqdu waa inay ku filnaataa waxyaabaha lagama maarmaanka ah, sida cuntada, dharka, iyo hoyga. Ujeeddadu waa in taageerada masruufku uu yahay mid ku meelgaar ah oo ay tahay inaad isku filnaato sida ugu dhakhsaha badan. Haddii ay kugu adag tahay inaad dalbato, degmadaada waxaa ku waajib ah inay ku caawiso.

12. Waxaan ka walwalsanahay hooyaday. Hooyaday ma awoodi inay maarayso dhaqaalaheeda. Maxaan samayn karaa?

Waxaad ku caawin kartaa inay hooyadaa codsato qof ka mas'uul ah (god man). Qofka mas'uulka ahi wuxuu noqon karaa qof qaraabo ah ama qof ay magacaabeen Guddida qaabilsan dadka mas'uuliyiinta ah ee degmadaadu. Sida caadiga ah, waxaa loo baahan yahay baaritaan ama warqad uu dhakhtar qoray oo muujinaysa baahida loo qabo **qofka mas'uulka noqonaya (god man)**. In qof loo ogolaado qof ka mas'uul ah caadigan waa dadaal ikhtiyaari ah.

Dhanka kale marka laga eego, qofka wax maamulaya (förvaltare) waxaa magacaabi kara maxkamadda degmada haddii aanu qofku daryeeli karin naftiisa iyo hantidiisa. Waxaa suurtagal ah in laga hortago dhibaatooyinka iman kara ka hor inta aan dadaalada bulshada aanay meesha iman iyadoo la qorayo waxa loogu yeero awood siinta ama wakiilashada mustaqbalka.

13. U malayn maayo in aan xaq u leeyahay lacag hawlgab ah oo badan. Sidee ayey dhab ahaan u shaqeysaa arrintaasi?

Lacagtaada hawlgabku waxay ku salaysan tahay dakhligaaga nolosha oo dhan. Haddii aanad waxba soo shaqayn waxaad heli doontaa lacagta dammaanadda hawlgabka. Haddii aad soo shaqaysay laakiin aanu dakhigaagu aad u badnayn, waxaad sidoo kale heli doontaa lacag hawlgab oo ku salaysan dakhli hoose. Inta badan tani kuma filna inaad si aad ugu daboosho kharashyadaada. Markaas waxaad xaq u leedahay inaad codsato kaalmada kirada guriga iyo taageerada dhaqaale ee waayeelka. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho heer nololeed oo macquul ah. Tan waxaad ka raadsanaysaa Hey'adda Hawlgabka.

14. Anigu lama heshiin karo qofka mas'uulka iga ah, xaq ma u leeyahay in aan beddelo?

Haa, waxaad xaq u leedahay inaad beddesho. La xidhiidh xafiiska guddida qaabilsan dadka mas'uuliyiinta ee la magacaabo (Överförmyndarkansliet) ee degmadaada.

15. Waxaan dib ula dhacay kirada, waxaanan aad uga welwelsanahay in aan lay ogolaan inaa sii deggaano. Maxaan sameeyaa anigu?

Waxaa muhiim ah inaad la xiriirto mulkiilaha gurigaaga oo aad u sheegto waxa dhacay si aad u samaysaan qorshe wadajir ah oo ku saabsan sida aad ugu soo kabsan lahayd. Bixi kirada ugu da'da weyn ee aan la bixin marka hore iyo inta aad awoodid inaad bixin karto kirada ku xigta. Haddii aanad laftaadu xallin karin xaaladdaada oo aad halis ugu jirto in guriga lagaa tuuro, waxaad caawimaad ka heli kartaa adeegga bulshada ee degmadaada.

Gurigaagu waxa uu ka mid yahay waxyaalaha ugu muhiimsan ee aad haysato, markaa hubi in aad had iyo jeer bixiso kiradaada guriga marka hore.

16. Waxaa laygu leeyahay hal ama in ka badan oo deymo ah oo laygaga leeyahay shirkadaha daymaha ururiya (inkassobolag). Xaqiiqdii ma rabo in loo gudbiyo Hey'adda dawlada ee qaabilsan lacag ururinta (Kronofogden). Maxaan samayn karaa?

Waxaad la xidhiidhi kartaa shirkadaha lacagta ururiya ee lacagta kugu leh oo waxaad waydiisaa qorshaha qaybinta lacag bixinta. Haddii lagugu leeyahay deymo badan, waa inaad ka fiirsataa in lacagtaadu ay ku filnaato inaad ku bixiso qaddar lacag deymaha dhammaantood. Si kastaba ha ahaatee, aad ayey muhiim u tahay inaad marka hore awooddo inaad bixiso kharashyadaada maalinlaha ah, sida kirada iyo korontada. Haddii kale, xaaladdaadu si dhakhso ah ayey uga sii dari kartaa. Mararka qaarkood ma jiro wax kale oo aan ahayn in deymaha loo diro Hey'adda dawlada ee ururisa lacagaha deymaha ah (Kronofogden) si aad u hesho lacag ku filan waxyaabaha kuugu muhiimsan.

Ha ka waaban inaad codsato taageero haddii arrintani ay kugu keento inaad dareento xanuun ama niyad-jab.

17. Waxaan warqad ka helay Hey'adda dawlada ee ururisa lacagaha deymaha ah (Kronofogden) taas oo ku saabsan dalab alaab qaadasho ah. Miyey imanayaan oo ay qaadanayaan wax kasta oo aan leeyahay oo aan hadda haysto?

Maya, looma ogola inay sidaa sameeyaan. Caadi ahaan, Hey'adda lacag ururinta deymuhu waxay marka hore eegaan hantida aad haysato, sida saamiyada, lacagaha, lacago koontada kuugu jira ama baabuur xoogaa qaali ah. Waxay kaloo baari karaan inaad haysato waxyaabo qiimo badan jooga, sida saacadaha iyo dahabka.

Waxa ugu badan waa qaadista hanti ka soo harta dakhligaaga. Si ka qaadista hantidu ay sax u noqoto, Hey'adda lacag ururinta deymuhu (Kronofogden) waxay u baahan yihiin inay ogaadaa dakhligaaga iyo qaar ka mid ah kharashyadaada. Tusaalooyin ka mid ah macluumaadka ay Hey'adda lacag ururinta deymuhu (Kronofogden) u baahan tahay waa kirada, daryeelka carruurta, safarrada shaqada, daryeelka caafimaadka iyo dawooyinka, xitaa waxyaabaha ka baxsan caymiska kharashka badan (högkostnadsskyddet). Waxaad sidoo kale heli kartaa in aan lagaa qaadin hantida sida okiyaalaha indhaha, daryeelka ilka, ugu adeegyada guriga ee dadka waaweelka ah iyo qalabka caawinta. Mar kasta waxaad heli doontaa lacag kugu filan si aad u daryeesho noloshaada, sida kirada, korontada, iyo cuntada." Waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad lacag u haysato daryeelka caafimaadka, daawooyinka iyo xaaladaha gaadiidka qaarkood.

18. Deymo badan ayaa laygaga leeyahay Hey'adda lacag ururinta deymaha (Kronofogden) laakiin ma garanayo intay leeg tahay wadarta deyntu. Sidee ayaan ku hubin karaa taas?

Waad la xiriiri kartaa Hey'adda lacag ururinta deymaha (Kronofogden) oo waxaad ka dalban kartaa deymahaaga guud ee ay kugu leeyihiin. Laakiin ka feker in aan la hubin in dhammaan deymahaaga ay wada yaalaan Hey'adda lacag ururinta deymaha (Kronofogden). Sidaa darteed, waxaa laga yaabaa inaad sidoo kale u baahato inaad la xiriirto shirkadaha deyn ururinta (inkassobolagen).

19. Maxay tahay deyn ka deyntu (skuldsanering)

Deyn ka cafintu (skuldsanering) waxaa loogu talagalay dadka lagu leeyahay daymo badan oo aan awoodin inay iska bixiyaan muddo sanado ah. Caadiyan, cafinta dayntu waxay socotaa shan sano oo aad muddadaas ku bixiso hadba inta aad awooddo. Hey'adda lacag ururinta deymaha ayaa go'aan ka gaaraysa oo xisaabinaysa awooddaada lacag bixineed. Haddii aad leedahay dakhli ka hooseeya heerka Hey'adda lacag ururinta deymaha, waxaad weli heli kartaa deyn ka cafin, laakiin markaa waxba ma bixin doontid.

Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato, waxaa jira macluumaad fiican oo ku jira bogga Hey'adda lacag ururinta deymaha (Kronofogden) **kronofogden.se**. Halkaas waxaad sidoo kale ka tijaabin kartaa haddii ay adiga macno kuu leedahay inaad codsato.

20. Waxaan jeclaan lahaa in aan codsado deyn ka cafin (skuldsanering), sideen ayaan sameeyaa?

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo lagu raadsado deyn ka cafinta. Waad la xiriiri kartaa talo bixinta miisaaniyadda iyo daynta ee degmadaada, kuwaas ayaa kaa caawin kara. Waxaad sidoo kale si toos ah uga codsan kartaa bogga websaydka ee Hey'adda lacag ururinta deymaha (Kronofogden), ku qor "codso deyn ka cafinta" markaa waxaad heli doontaa dukumeenti sax ah. Macluumaadka aad u baahan tahay inaad soo ururiso inta aanad codsan ka hor ayaa ah isugeynta daymahaaga. Inta badan waxaad ku geli kartaa aqoonsiga bangiga bogga Hey'adda lacag ururinta deymaha iyo shirkadaha deyn ururinta. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa caddaynta dakhligaaga iyo qaar ka mid ah kharashaadkaaga, sida kiradaada. Waa muhiim in aanad gelin deymo cusub oo aad maarayn karto dhaqaalahaaga maalinlaha ah inta aanad codsan nadiifinta/xallinta deynta ka hor.

Haddii aad u baahan tahay taageero iyo caawimo ku saabsan xiriirka aad la leedahay hey'addaha ama foomamka adag, waxaa lagugu soo dhawaynayaa inaad la xiriirto waaxdaada Verdandi.

Meelo badan oo waddanka ka mid ah, waxaanu ku leenahay xafiisyada Caddaalada "Rättvisekontor" oo bixiya aqoonta ku saabsan xuquuqaha bulshada ee ugu caansan waxaanay sidoo kale bixiyaan taageero-saaxiibtinimo xaaladaha adag ama nugul.

Isticmaal lambarka QR-koodka ee hoose macluumaadka xiriirka ee qaybta Verdandi ee adiga kuugu dhow. Soo dhawow!

LA XIRIIR XAFIISKA CADDAALADA RÄTTVISE-KONTOR EE VERDANDI EE DEGMADAADA

HALKAN WAXAAD KA HELAYSAA BUUG YAR OO DHOWR LUQADDOOD KU QORAN

verdandi